

Arjiga Ogalaanshaha daaweynta Rugta Caafimaadka (Central clinic)
Ilmaha yar yar,kuwa xanaanada ku jira iyo caruurta dusiyada hoose

Waalidiinta iyo ilaaliyaasha iskuulada St.Louis Park ee qaaliga ahow: Haddii aad qabtid caruur 18-sano ka yar oo ku nool St.Louis Park ama iskuul ka dhigta waxay xaq u lee yihiin in ay ka helaan daaweyn bilaash ah Central Clinic, Central Community Center, 6300 Walker St.St.

Louis Park.Si cunugaada uu helo adeegaan waa inaad buuxisaa arjiga ogalaashaha oo aad ku soo celisaa rugta caafimaadka (kilinigga) ama xafiiska Iskuulka cunugaada uu dhigto, cunugii aan heysan arji ogalaansho oo aan saxiixneyn (gacanta ku heysta ama uu ku jiro feylkiisa caafimaadka) shaqaalaha kiliniga(rugta caafimaadka) ma daaweyn karaan.

Waxaan u ogalaanayaa _____ in uu isticmaalo **magaca cunugga** Central Clinic (kilinigga), waxaan u ogalaandoonaa cunugayga inuu helo dhamaan adeegyada uu bixiyo kilinigga ayna ka mid yihiin tusaale ahaan:

Daryeel caafimaad oo joogta ah: Daaweynta hargabka, (dureyga) qabow- ga xun, jeermiska cudarada dhaliya (infekshanka), madax-xanuun, dheg- xanuun, dhuun (cunaha) xanuun, urgacasho, sarmada, gubashada, jirooyinka maqaarka, bog xanuun (calool ku jir), dhabar xanuun, baaritaanka jirka oo loogu tala galay cayaaraha iyo shaqada.

Latalin: Gar gaar la xiriira walwalka iyo walaaca,niyad jabka, daayacada iyo sixun wax u isticmaalida adeegga caafimaadka maskaxda,horumarinta sharafta nafta,ka hortaga is dilka.

Aqoonta caafimaadka: maa mulka miisaanka, latalin cunta qaadasho gooni ah,ka hortaga cabida sigaarka, abaabulka nabadgelyada,ka hortaga aydhiska.

Adeegga shaybaarka: Fiirinta dgiigga iyo kaadida oo joogta ah, waxyaabaha jeermiska dhaliya ee cunaha,baaritaanka sonkorowga.

Muhiim: Haddi ay jiraan adeegyo kor ku xusan oo aadan u doonayn cunugaada inuu helo xariiqin dhexda ka mari; caruurtuna waxay heli doonaan adeegyada liiska ku hara oo keliya.

Waxyaabaha la qoonsado(aleerjikada): Cunugayga wuxuu qoonsadaa(dhibsadaa daawo markuu cuno) kuwaan soo socda:Isticmaal foomka gadaashiisa haddii aad u baahatid boos dheeraad ah.

Daawooyinka: Cunugayga wuxuu isticmaakayaa daawooyinka soo socda: Isticmaal foomka gadaashiisa haddii aad u baahatid boos dheeraad ah. Saxiixa _____. Xiriika aad la leedahay

Waalidka/Ilaaliyaha Ardayga _____ Taariikhda _____ Telefoonka maalintii lagaa helo _____.

Arjigaan ogalaanshaha waxaa la gelin doonaa feylka kilinigga (rugta caafi- maadka) wuxuuna socon doonaa ilaa cunugaada uu ka gaaro 18-sano ama aad soo buuxisid arji ogalaansho cusub kaasoo bedeli doona kii hore. Arjiga ogalaanshaha waxaa laga helaa kilinigga iyo dhamaan iskuulada St. Louis Park kuwa dowladda iyo kuwa gaarka loo leeyahay.

Rugta caafimaadka (central clinic-ga) waxaa lagu horumariyey dadaal ay bixiyeen Health System Minnesota (kuwaas oo ay ku jiraan dhaqtaradaan: Park Clinic and Methodist Hospital) iyo Iskuulada dowladda ee St.Louis park. Fadlan ku soo celi foomkaan Central Clinic 6300 Walker St. qolka 228,

**St. Louis Park, MN 55416. Ama xafiiska Iskuulka cunugaada uu dhigto.
Wixii su'aalo ah kala soo xiriir 952-993-1100 (TTY: 952-993-1702)**